SHARCI lambar 22 taariikh 2 Nof. 1985 Dhismaha Rugta Ganacsiga, Warshadaha Beeraha, Xoolaha, Kalluumeysiga iyo Farshaxanka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga,

WUXUU SOO SAARAYAA
Sharciga Sooo Socda:

XUBINTA KOOWAAD

DHISMAHA RUGTA IYO UJEEDDOOYINKEEDA

Qodobka 1aad
Dhismaha

1. Waxaa la dhisay Rugta Ganacsiga, Warshadaha, Beeraha, Xoolaha, Kalluumeysiga iyo Farshaxanka oo hadda wixii ka dambeeya loogu yeeri doono Rugta.

2. Rugtu waa hay'ad leh shakhsiyad qaanuuni ah

3. Xarunta Rugtu waa Muqdisho, waxayna laamo ku yeelan kartaa magaalooyinka kale oo Dalka.

Qodobka 2aad
UJTEDDOOYINKA RUGTA

Ujeeddooyinka Rugtu waxay yihiin kuwa soo socda:

a) Masilaadda iyo ilaalinta danaha ganacsatada, Warshadleyda, beeraleyda, Xoolaleyda, Kalluumeysatada iyo farshaxanleyda iyo horumarinta dhaqdhaqaaqooda ganacsi iyo dhaqaale.

b) Ururinta isku duwidda iyo baafinta dhamaan wararka, tilmaamaha iyo tirokoobyada khuseeya ganacsiga, warshadaha, beeraha, xoolaha, kalluumeysiga iyo farshaxanka.

t) Keydinta iyo diiwaangelinta ganacsatada, warshadleyda, beeraaleyda, xoolaleyda, kalluumeysatada iyo farshaxanleyda, iyadoo u kala saaraysa isuguna duweysa noocyada xirfadahooda.

J.D.S. Iyo Dalalka kale ee Adduunka.

x) Ururinta iyo keydinta samballada badeecooyin ka (campionario) ee saameeya dhoofinta iyo keenidda

kh) Dersidda mashaakilka ganacsi ee dalka, iya doo la kaashanaysa guddi gaar ahaaneed oo ka kooban aqoonyahanno ku xeel dheer arrimaha la baarayo.

d) Dhiirrigelinta dhaqdhaqaaq kasta oo waxtar u leh horumarinta dhaqaalaha ee Dalka.

r) qabanqaabinta carwooyinka dalka iyo ka qay bgalka carwooyinka dibadda.

s) dejinta buugga (alpa) maamulayaasha, habeynta hawlaha xeeldheeryaasha (periti) ganacsiga, war shadaha beeraha, xoolaha, kalluumeysiga iyo farshaxa nka qiimeeyayaasha iyo dallaaleyda, keynidda buugga dhoofiyayaasha iyo xulayaasha.

kh) qabanqaabinta marka oggolaasho laga helo hay'adaha ay khuseyso ergooyinka ka qaybgalaya fadhi yada iyo shirarka caalamiga ah ee looga doodayo arri maha ay Rugtu u xil saaran tahay.

dh) qabanqaabinta suuqyo ganacsi.

c) La bahoobidda Rugaha ganacsiga caalamiga, marka dan loo arko.

Qodobka 3aad
Shahaaddo Bixin

1. Rugtu waxay qabanaysaa, marka laga codsado hawlaha soo socda:

a) soo saaridda shahaaddooyinka (certificati) ti maamaya badeecaddu dalka ay ka timid jinsiyadda dhoofiyayaasha, ascaarta iyo shahaaddooyinka kale ee Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsigu uu ogolaado.

b) Sugidda (autanticasiona) nuqulada laga sameeyo qoraallada ku xafidan xafiisyada Rugta.

t) sugidda qaansheegtooyinka (fatture) badeeca

2. Khidmadda Rugta ay ku leedahay shahaadooyinka iyo hawlaha kale oo ay qabato, kuna tiimaaman qod ookan waxaa xaddidaya Golaha guud, isagoo dhegeys tay soojeedinta guddiga maamulka ee Rugta.

### Qodobka 4aad
### Dhexdhexaadin

1. Rugtu waxay dhisaysaa guddiyo dhexdhexaadin oo xaliya isqabadyada la xiriira ganacsiga, warshadaha, beeraha, xoolaha, kalluumeysiga iyo farshaxan ka oo ay u soo gudbiyaan dhinacyada isqabadku uu khuseeyo.—

2. Xubnaha Guddiyada dhexdhexaadinta ugu yaraan mid ka mid ah waa inuu noqdaa xubin ka tirsan Guddiga Masuulka ee Rugta.

### Qodobka 5aad
### Xiriirka Rugta

1. Rugtu waxay la xiriiri kartaa rugaha kale ee Adduunka iyadoo weydiisaneysa wargelin ku saabsan hawlaha ay u xilsaaran tahay.

2. Isla ujeeddadaas waxay ula xiriiri kartaa hay' adaha Dawladda.

3. Hay'adaha dawladda waxaa ku waajib ah in ay u gudbiyaan Rugta xogwarranka iyo wargelinta la wey diistay, haddii ayan ka hor imaaneynin shuruudda iyo xeerarka Dalka.—

## XUBINTA LABAAD
## XUBINNIMADA IYO MAAREEYNTA RUGTA

### Qodobka 6aad
### Xubinnimada Rugta

1. Waxaa xubin ka noqon kara Rugta qof kasta oo ruqsad u haysta hawlo ganacsi warshadeed, beereed xoolaad, kalluumeysi iyo farshaxaneed oo diiwaangashan, bixiyeyna dhigaalka Rugta.

2. Sidoo kale waxaa xubin ka noqon kara Rugta

qof kasta oo qaanuuni ah ee hawlaha faqradda hore ku tilmaaman qabta.—

3. Qofkii doonaya inuu xubin ka noqdo Rugta wuxuu soo qoranayaa codsi qoraal ah oo ku lifaaqan caddeyn muujineysa buuxinta shuruudaha ku tilmaaman faqradda hore ee qodobkan.—

### Qodobka 7aad
### Maareeynta Rugta

Maareeyaha Rugta waxaa leh xubnaha soo socda:

1. Golaha Guud ee ganacsatada warshadleyda, beeraleyda, xoolaleyda, kalluumeysatada iyo far/yda.

2. Guddiga Maamulka:

3. Guddoomiyaha Guddiga Maamulka iyo

4. Ururada Ganacsiga, Warshadaha. Beeraha, Xoolaha, Kalluumeysiga iyo farshaxanka oo qaabka dhismahooda iyo hawlahooda lagu tilmaami doono Xeerhoosaadka.—

### Qodobka 8aad
### Xilka Golaha Guud

1. Golaha guud wuxuu ka kooban yahay dhammaan xubnaha Rugta ee oofiya shuruudaha sharcigan ku tilmaaman.—

2. Golaha Guud waa hay'adda ugu sarreysa hoggaaminta Rugta wuxuuna qabtaa, hawlaha kale ee sharcigan ku qeexan ka sokow, kuwa soo socda:

a) Dejinta Siyaasadda Guud ee Rugta.

b) Oggolaashaha Miisaaniyadda ku talo galka.

t) Oggolaashaha Miisaaniyadda Xisaabxirka.

j) Doorashada xubnaha Guddiga Maamulka.

x) Magacaabidda Hantidhowrayaasha Rugta.

kh) Oggolaashaha warbixin sannadeedka Guddiga

d) Go'aan ka gaaridda arrimaha kale ee ku soo kordha.—

Qodobka 9aad

Shirka Golaha

1. Golaha Guud wuxuu yeelanayaa sannadkiiba hal fadhi oo caadi ah waxaana isugu yeeraya guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee Rugta.

2. Fadhiga Golaha Guud wuxuu ku ansaxayaa markay ka soo qayb galaan aqlabiyadda xubnaha Rugta

3. Haddii shirkaasi ugu horreeya la heli waayo aqlabiyaddaas, fadhiga waxaa dib loo dhigayaa 15 maalmood. Fadhiga dambe wuxuu ku ansaxayaa tirada ka soo qayb gasha.—

4. Go'aanada Golaha Guud waxay ku ansaxayan aqlabiyadda inta joogta.—

5. Haddii codadku ay isla ekaadaan, waxaa la raacayaa dhinaca Guddoomiyahu uu ku cod bixiyey.

6. Golaha Guud waxaa la isugu yeerayaa saddex bilood ka hor taariikhda shirka.—

7. Waxaa kaloo qabashada shirka lagu soo qorayaa Faafiata Rasmiga ah ee J. Iyo qalabka warbaahinta dalka. ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda Sh.

8. Goluhu wuxuu yeelan karaa shir aan caadi ahayn, waxaana isugu yeeri kara Guddiga Maamulka. Sidoo kale shirka aan caadiga ahayn waxaa codsan kara shan meelood meel xubnaha Rugta iyo wasiirka warshadaha iyo Ganacsiga.—

9. Warqadda shir ugu yeeridda xubnaha Rugta waxaa lagu lifaaqayaa ajandaha shirka.

10. Golaha Guud waxaa shirgudoomiye u noqonaya Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ama haddii uu maqan yahay. ku-xigeenkiisa waxaana xoghaye u noqonaya Xoghayaha Joogtada ah ee Rugta Ganacsiga.

11. Doodaha iyo go'aannada golaha guud waa la diiwaan gelinayaa waxaana wada saxiixaya Guddoomi

Qodobka 10aad
Guddiga Maamulka

1. Guddiga Maamulka ee Rugta waa hay'adda ka mas'uulka ah xaqiijinta himilooyinka Rugta iyo fulinta go'aamada Golaha Guud.—

2. Guddiga Maamulku wuxuu ka koobān yahay 21 xubnood oo misala qaybaha kala duwan ee Rugta ka kooban tahay waxaana dooranaya golaha guud isagoo ka dhex dooranaya xubnaha Rugta ee xaqa u leh in ay ka qayb galaan shirka Golaha Guud.

3. Qofka xubinta ka noqonaya Guddiga Maamulka waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

a) In da'diisu aysan ka yaraan 25 Sano.
b) In si fiican wax u qori karo una akhrin karo.
t) In uu ka shaqeeyey, ugu yaraan, hal sano hawl ganacsi, warshad, beer xoolo, kalluumeysi ama far/xan

4. Xubnaha Guddiga Maamulku waxay xilka hay nayaan laba sannadood dibna waa loo dooran karaa.

5. Markuu Guddoomiyuhu maqan yahay ama ay ku timaado sabab uu xilkiisa ku gudan kari waayo, xil-ka Guddoomiyenimada waxaa qabanaya Guddoomiye ku xigeenka.—

6. Guddiga Maamulka waxaa xoghaye u noqona-ya xoghayaha joogtada ah ee Rugta.

7. Doodaha iyo go'aannada Guddiga Maamulka waa la diiwaangelinayaa waxaana si wadajir ah u sa-xiixaya Guddoomiyaha iyo Xoghayaha.

8. Guddoomiyaha Guddoomiye ku xigeenka iyo xubnaha kale ee Guddiga Maamulka wax lacag ah ku-ma qaadanayaan xilkaas hase yeeshee waxaa loo celi-nayaa kharajyada ay galaan marka ay fulinayaan haw lo la xiriira xilkooda.

## Qodobka 11aad

### Xilka Guddiga Maamulka

Guddiga Maamulka ee Rugta wuxuu qabanayaa hawlaha soo socda:

a) Fulinta ujeeddooyinka Rugta iyo go'aannada Golaha Guud.

b) Dersidda Miisaaniyadda ku talo galka inta aan la hordhigin Golaha Guud.

t) Oggolaashaha Miisaaniyadda xisaabxirka, isagoo dhegeystay warbixinta hantidhowrayaasha Rugta.

## Qodobka 12aad

### Fadhiyada Guddiga Maamulka Rugta

1. Guddiga Maamulku waa in uu bishiiba hal mar kulmaa.—

2. Fadhiga Guddiga Maamulku wuxuu ansaxiyaa marka ay ka soo qayb galaan aqlabiyadda xubnaha Guddiga go'aannaduna waxa ay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.—

3. Haddii ay bannaanaato jagada xubin ka mid ah xubnaha Guddiga Maamulka, isla Guddiga ayaa ma gacaabaya beddelkiisa, isagoo kadhex xulanaya xubnaha Rugta ee leh shuruudaha xubinnimada.

4. Magacaabiddan waxaa loo bandhigayaa Golaha Guud, fadhigiisa ugu horreeya, si uu ansixiyo ama uu u doorto xubin kale. Xubinta cusub waxay xilka hayneysaa muddadii u harsanayd qofkii ka harreeyey.

5. Marka saddex meelood meel xubnaha Guddiga Maamulku ay bannaanaadaan, waa in fadhi deg deg ah loogu yeeraa Golaha Guud si loo doorto xubnihii beddeli lahaa.—

Qodobka 13aad

Guddoomiyaha Guddiga Maamulka

Guddoomiyaha Guddiga Maamulku wuxuu mas'uul ka yahay fulinta hawlmaalmeedka Rugta gaar ahaan wuxuu qabtaa hawlaha soo socda:

a) Isugu yeeridda fadhiyada Guddiga Maamulka.
b) Isugu yeeridda fadhiyada Golaha Guud.
t) Fulinta Go'aannada Golaha Guud iyo kuwa Guddiga Maamulka.

j) Kormeerka iyo xaqiijinta habsami u socodka hawlaha Rugta.

x) Masilaadda Rugta Maxkamadaha hortooda.
kh) In uu magaca Rugta ku saxiixo ballanqaadyada, isagoo dhowraya shuruudaha sharciga ah.

Qodobka 14aad

xaqa doorashada

1. Waxaa wax dooran kara, lana dooran karaa xubinta Rugta ee diiwaangashan, bixisay dhigaalka ka qaybgalka Rugta, oofisayna shuruudaha kale ee sharci ga iyo xeer hoosaadka ku tilmaaman.

2. Shakhsiyaadka qaanuuniga ah, waxaa doorash ada uga qayb galaya qofkii sharci ahaan masila.

Qodobka 15aad

Shuruudaha Doorashada

Lama Dooran karo, waxna ma dooran karo.
a) Shaqaalaha Rugta.

b) Shakhsiyaadka uu khilaaf dhexmaray iyaga iyo Rugta.

t) Qof kasta oo la leh xiriir amase adeeg wax is dhaafsi ama u soo uruuriya Rugta khidmado iyo xuquq kale.—

j) Shikadaha Guddiga Maamulka uu ka reebo ka qaybgalka doorashada, xiriir maamul toos ah amase

x) Qof kasta oo horay u soo hayey maamulka Rugta, xagga lacagta, ee aan xisaab celin u soo sameyn.

kh) Qof kasta oo mushaar ama gunno ka qaata ha y'ado ay Rugtu maamusho.

d) Qof kasta oo Rugta u qaameysan welina aan deen 'bixin.

r) Maamulayaasha Rugta iyo kuwa hay'adaha ku jira ilaalinta Rugta.—

s) Qof kasta oo sharci ahaan laga mamnuucay maa mulka ama laga qaaday awoodda tasaruufka.

sh) Ganacsato musalaftay ilaa iyo inta xaaladda musallifku ay socoto.

dh) Qof kasta oo uu ku dhaco xukun maxkamad eed ee kana dambays ah, ciqaabtu inkastba ha la ekaa tee dambiyada soo socda dartood.

Tuugo, Iibsasho ama dullaalid xoolo la soo xaday ama dambi kale ka yimid khiyaamo, ku takri falid qayaano, xatooyo xoolo dadweyne been abuur qoraal. isti cmaalid warqad la been abuuray, markhaati fur been ah maxkamad horteed, u heshiin dembi, laaluush, mu sallifid ku talo gal ah.—

## Qodobka 16aad

## Ka dhicidda Xubinnimada

1. Xubin kasta ee loo doortay Guddiga Maamulka marka ay ka lunto shuruudihii lagu doortay ama ay horay uga maqnaayeen shuruudahaasi, wuxuu ka dhacayaa jagadii loo doortay.

2. Sidoo kale waxaa jagada xubinnimada ka dha caya qofkii saddex goor oo isdabajoog ah. cudur daar la'aan ka maqnaaday fadhiyada, isagoo qoraal loogu digay, haddana mar afraad maqnaaday.

## Qodobka 17aad

## SHARRAXAADDA XUBINNIMADA

1. Qofka daneynaya in uu ka qayb galo doorashada xubinnimada Guddiga Maamulka ee Rugta, waa in uu isu soo sharraxaa xilkaas, isagoo qoraal ku soo

2. Musharruxu wuxuu khasnadda Rugta dhigayaa lacag dhan 10.000/=. Lacagtaas waxay ka mid noqoneysaa dakhliga Rugta, haddii Musharruxu uu ka tanaasulo tartanka ama uu ku guuleysan waayo doorashada, isagoo helay tiro ka yar toban meelood meel codadka ansaxa ah.

3. Marka ay dood ka timaado sharcinimada doorashada Xubnaha Guddiga Maamulka, waxaa go'aan ka gaaraya Guddi ka koo'ban Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga, Garsoore ka tirsan Maxkamadda Gobolka iyo laba Xubnood oo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsigu uu ka dhex xulay Xubnaha Rugta.

4. Guddiga faqradda hore ku tilmaaman go'aankiisu waa kama dambeys, wuxuuna ku guddoonsanayaa cod hal dheeri ah. Haddii codku isla ekaado, waxaa la raacayaa dhinaca Guddoomiyuhu uu u cod bixiyey.

5. Liiska musharrixiinta waxaa lagu dhejinayaa looxa ogeysiiska ee Rugta, 15 maalmood ka hor taariikhda doorashada.

6. Tirada ay ku leedahay Guddiga Maamulka qayb kasta oo ka mid ah qaybaha Rugta, waxaa xaddidaya Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

### Qod. 18aad

### Xoghaynta Joogtada ah ee Rugta

1. Rugtu waxay yeelaneysaa Xoghaye Joogto ah.

2. Xaghayaha Joogtada ah waxaa magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

### Qod. 19aad

### Xilka Xoghayaha Joogtada ah

1. Xoghayaha Joogtada ah wuxuu fulinayaa go'-

2. Gaar ahaan, Xoghayaha Joogtada ah waxaa uu masuul ka yahay xafiisyada Rugta iyo xaqiijinta habsami u fulinta hawlaha ay qabtaan xafiisyadu. Wuxuu ka qayb galaa fadhiyada Golaha Guud iyo Guddiga Maambulka isagoo Xoghayn ka noqonaya. Wuxuu xaq u leeyahay in uu hadal ka qaato doodaha fadhiyada, hase yeeshee cod ma laha.

3. Xoghayaha Joogtada ah waa Madaxa Shaqaalaha Rugta, isagaana ka masuul ah hawlgelintooda iyo qiimeyntooda.

4. Waxaa kale oo Xoghayaha Joogtada ah diyaarinayaa Ajendayaasha shirka Guddiga Maamulka iyo kan Golaha Guud ee Rugta, isagoo ka tilmaan qaadanaya Guddoomiyaha Rugta.

Qod. 20aad
Shaqaalaha Rugta

1. Rugtu waxay yeelaneysaa shaqaale u gaar ah.
2. Habka magacaabidda iyo dallacaadda Shaqaalaha, mushaarka, gunnooyinka, fasaxyada. anshaxmarinta, go'idda xiriirka shaqo iyo arrimaha kale ee saameeya Shaqaalaha waxaa go'aaminaya Guddiga Maamulka.
3. Go'aanka faqradda hore ku tilmaaman waxaa lagu meelmarinayaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsigu.

XUBINTA SADDEXAAD

HAWLGALKA RUGTA IYO ILAALINTA HANTIDA

MADAXA KOOWAAD

MAALIYADDA RUGTA

Qod. 21aad
Hantida Rugta

Hantida Rugtu waxa ay ka kooban tahay:
a) Dhigaalka ka mid noqoshada xubnaha Rugta;
b) Dhigaal sannadeedka Xubnaha Rugta;
t) Dakhliga ka soo gala qoraallada iyo shahaa-

gyada guud ay qabato dartood;

kh) Dakhliga ku soo gala hibo, deeq ama dardaaran;

d) Khidmadda ay ku leedahay shatiyada ganacsiga.

Qod. 22aad

Dhigaalka bilowga ah

1. Qof kasta oo xubin ka ah Rugta, wuxuu bixinayaa dhigaal lagu tilmaamo dhigaalka soo gelitaanka Rugta. Qiimaha dhigaalka waxaa xaddidaya Guddiga Maamulka isagoo tixgelinaaya awoodda dhaqaale ee Xubnaha kala duwan ee Rugta.

2. Dhigaalku marna kama yaraan karo Shs. 1.000/= (kun).

Qod. 23aad

Dhigaal sannadeedka

1. Qof kasta, ha ahaado shakhsi dabeeci ah ama qaanuuni ah, oo Xubin ka ah Rugta wuxuu bixinayaa dhigaal sannadeed.

2. Qiimaha dhigaalka waxaa xaddidaya Guddiga Maamulka isagoo tixgelinaaya awoodda dhaqaale ee Xubnaha kala duwan iyo qaybta uu ka tirsan yahay.

3. Dhigaal sannadeedku kama yaraan karo Shs. 300/= (saddexboqol) kamana badnaan karo Shs. 1000 (kun).

4. Go'aannada Guddiga Maamulka oo ku saabsan qiimaha dhigaallada waxaa Xeer ku ansixinaaya Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

Qod. 24aad

Diiwaangelinta

Diiwaangelintu waxaa weeye Shs. 1000 (kun) wixii leh shatiga koowaad iyo kan labaad, wixii ka hooseeyana Shs. 300 (saddexboqol).

Qod. 25aad

Bixinta dhigaal sannadeedka

naayo ee sannad kasta waana in la bixiyaa ugu dambeysta dahmmaadba bisha Juun ee sannad walba.

Haddii taariikhdaas dib looga dhaco, dhigaalku waa laba jibbaarmayaa.

Qod. 26aad

Kharajka

1. Kharajka Rugta ee lagu fulinayo hawlaha ay u xilsaaran tahay waxaa laga bixinayaa dakhliga soo gala.

2. Waxaa bannaan Rugtu in ay maalgelin ku sameyso lacagteeda.

3. Maalgelinta waxaa shardi u ah oggolaanshaha Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

MADAXA LABAAD

MIISAANIYADDA RUGTA

Qod. 27aad

Diyaarinta Miisaaniyadda

1. Guddiga Maamulka ee Rugtu wuxuu diyaarinayaa miisaaniyad koobeysa dakhliga iyo kharajka saddex bilood ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeedka wuxuuna soo hordhigayaa Golaha Guud si loo oggolaado.

2. Sannad miisaaniyadeedka Rugtu wuxuu billaabanayaa 1da Jennaayo wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disember ee sannad kasta.

3. Miisaaniyaddu waa in ay ka koobnaataa lacagta lagu fulinayo gudashada xilka Rugta, bixinta kharajyada maamulka iyo dayactirka hantida Rugta.

Qod. 28aad

Isku koobidda Miisaaniyadda

1. Rugta iyo Xubnaha Guddiga Maamulka uma bannaana inay galaan kharaj aan miisaaniyadda lacag loogu qoondeyn ama kharaj ka badan lacagta loo qoondeeyey.

2. Sidoo kale uma bannaana inay isku wareejiyaan madaxyada miisaaniyadda ama inay u isticmaalaan lacagta miisaaniyadda ujeeddo ka duwan middii loogu talo galay.

3. Isku wareejinta Madaxyada Miisaaniyadda waxaa ansixin kara Golaha Guud ee Rugta.

4. Go'aan kasta oo khilaafsan tilmaamaha faqradda hore ee Qodobkan waa wax kama jiraan; soo celinta lacagaha habkaas ku baxay waxaa wadajir ahaan masuul uga noqonaya Xubnaha Rugta ee ka qayb qaatay xad-gudubkaas, waana in ay ku soo celiyaan 7 maalmood gudahood laga billaabo marka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsigu ay soo celinta weydiisato.

Qod. 29aad

Xisaab-xirka

1. Guddiga Maamulku wuxuu diyaarinayaa, saddexda bilood ee ugu horreysa sannad kasta gudahooda, miisaaniyadda xisaab-xirka ee sannadkii la soo dhaafay wuxuuna u gudbinayaa Golaha Guud, isagoo raacinaya warbixin.

2. Golaha Guud, markuu dhegeysto Hantidhowrayaasha Rugta, wuxuu oggolaanayaa miisaniyadda Xisaab-xirka.

3. Miisaaniyadda ku talo galka iyo Xisaab-xirkaba waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

## MADAXA SADDEXAAD
## ILAALINTA HANTIDA

### Qodobka 30aad
### Guddiga Hantidhowrka

1. Rugtu waxay yeelanaysaa Guddi Hantidhowr oo ka kooban Guddoomiye iyo laba xubnood.

2. Guddiga Hantidhowrka waxaa magacaabaya Golaha Guud ee Rugta lagoo doorbiyaday soo jeedinta Guddiga Maamulka.

3) Muddada xilka ee xubnaha Guddiga Hantidhowrka waa laba sano dibna waa loo magacaabi karaa.

4. Jagada ka banaanaata Guddiga Hantidhowrka waxaa buuxinaya inta ka horreysa shirka Golaha Guud, xubin uu magacaabo Guddiga Maamulka.

5. Xubinta ama xubnaha lagu magacaabay habka ku tilmaaman faqradda hore ee qodobkan waa in laga nasixiyaa Golaha Guud, shirkii ugu soo horreeya. Haddii magacaabidaas Goluhu uu nasixi waayo, wuxuu magacaabayaa xubin buuxisa jagada bannaan.

### Qodobka 31aad

### Shuruudaha Xubnaha Guddiga Hantidhowrka

1. Xubnaha Guddiga Hantidowrku waa in ay ahaa daan aqoonyahanno ku xeeldheer xisaabaadka.

2. Xubnaha Guddiga Hantidhowrka kama mid noqon karaan Guddiga Maamulka ee Rugta.

### Qodobka 32aad

### Awoodda Guddiga Hantidhowrka

1. Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga Hantidhowrku waxay awood u leeyihiin, wadajir ahaan iyo mid midba, in ay baaraan diiwaannada xisaabaha Rugta iyo qoraallada kaleba.

3. Sidoo kale waxay hubin karaan hantida Rugta iyo ballanqaadyadeeda.

4 Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee Rugta waa in uu u suurta geliyaa Hantidhowrayaasha gudashada xilkooda.

5. Haddii Hantidhowrayaasha loo diido in ay gutaan waajibaadka faqradda hore ee qodobkan ku tilm aaman, waa in ay arrintaas ku sugaan warbixin loo gu dbiyo Guddiga Maamulka.

6. Sidoo kale haddii Guddiga Maamulku uu fududeyn waayo hawlgalka Hantidhowrayaasha waa in loo gudbiyaa Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga nuqul Warbixinta faqradda hore ee qodobkan ku tilmaa man arrintana loo bandhigaa Golaha Guud ee Rugta.

Qodobka 33aad

Hubinta dhawridda shuruucda

1. Guddoomiyaha Guddiga Maamulku waa inuu u gudbiyaa Hantidhowrka nuqul ah qoraallada loogu yeerayo Xubnaha Rugta in ay ka soo qayb galaan shir ka Golaha Guud, ugu yaraan 15 maalmood ka hor maalinta shirka.

2. Hantidhorku waa in uu ka soo qayb galaa shir ka Golaha Guud, hubiyaana waafaqsanaanta sharciga habka loo maray isugu yeeridda Golaha Guud, kana dhiibaa Golaha hortiisa wixii ra'yi ah ee la xiriira hawlahooda.

Qodobka 34aad
Warbixinno kala duwan

Haddii Xubnaha Guddiga Hantidhowrku ay isku khilaafaan warbixinadooda la hor dhigayo Golaha Guud, Hantidhowre kasta wuxuu diyaarinayaa warbixin u gaar ah, warbixinnada oo idilna waxaa laga hor akhri nayaa shirka Golaha Guud.

Hantidhowrayaashu si wadajir ah ayay masuul uga yihiin magdhowga khasaaraha Rugta kala soo gud- boonaada gefka ka dhacay Hantidhowrayaasha ee la xiriira gudashada xilkooda.

## XUBINTA AFRAAD
## ILAALINTA SARE

### Qodobka 36aad
### Awoodda Wasiirka

1. Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsigu wuxuu ku leeyahay Rugta awood ilaalin iyo toosin ah.

2. Wuxuu kaloo ku leeyahay awoodaha ku tilmaa man Sharcigan.

### Qodobka 37aad
### Wakiilka Wasiirka

1. Xoghayaha Joogtada ah ee rugtu, isagoo ka wa kiil ah wasiirka warshadaha iyo ganacsiga, wuxuu mas uul ka yahay fulinta iyo dhowridda shuruucda iyo xee rarka Dalka.

2. Xadgudubyada Xoghayaha Joogtada ah uu ku arko Maamulka Rugta wuxuu u gudbinayaa Wasiirka si loo saxo.

## XUBINTA SHANAAD
## AXKAAN GUUD

### Qodobka 38aad
### Hoggaamin ku meel gaar ah

1. Ilaa iyo inta laga dooranayo Guddiga Maamul- ka ee ku tilmaaman sharcigan, qodobkiisa 10aad, haw laha Rugta waxaa hoggaaminaya Guddi ka kooban Gud doomiye, Guddoomiye ku xigeen iyo saddex xubnood ee uu magacaabo Madaxweynaha J.D.S. Isagoo dhegeys tay soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

2. Xubnaha faqradda kore ku tilmaaman waxaa laga dhex xulayaa xubnaha Rugta.

3. Guddiga waxaa xoghaye u noqonaya xoghaya ha joogtada ah ee Rugta

4. Guddigu waxa uu qabanayaa xilalka [illegible]

5. Sidoo kale Guddoomiyuhu wuxuu qabanayaa xilalka Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee sharci gan ku tilmaaman.

### Qodobka 39aad
### Xeerka Rugta

Madaxweynaha J.D.S. Isagoo arkay soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, dhegeystayna go laha Wasiirrada, wuxuu soo saarayaa Xeer hoosaad dhammeystiraya sharcigan, gaar ahaanna tilmaamaya

a) Habka loo marayo doorashada Xubnaha Gud- diga Maamulka, nidaamka duridda qaabka ama natiija da doorashada, ka dhicididda ama ka saaridda xubinni mada iyo baabi'inta doorashada.

b) Dhismaha Guddiyada dhexdhexaadinta iyo tilmaamidda awoodda iyo qaabka hawlgalkooda.

t) Qaabka dhismaha iyo hawlaha ururrada ganac siga, warshadaha, xoolaha, kalluumeysiga & farsha/ka.

### Qodobka 40aad
### Aqoonsi

Xubnaha Guddiyada iyo Shaqaalaha Rugta waxaa loo aqoonsanayaa, marka ay arrintu taagan tahay shu ruucda ciqaabta Saraakiil guud, hantida Rugtana wa- xaa loo aqoonsanayaa hanti guud.

### Qodobka 41aad
### Burin

Waxaa la biriyey sharci lambar 38 ee 30.7.70 Bedde laadyadii ka dambeeyey iyo sharci iyo xeer kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

### Qodobka 42aad
### Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Nov. 198g

MADAXWEYNAHA J.D.S.